

**Golaha Wasiirrada Oo Caawa Soo Saaray Qaraar Ku Saabsan
Canshuuraha Iyo Dakhliga Dalka**



Muqdisho, Arbaco, 21 Agoosto 2024

Golaha Wasiirrada Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya oo caawa yeeshay kulan uu guddoominayey Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, Mudane Xamsa Cabdi Barre, ayaa soo saaray Qaraar muhiim ah oo ku saabsan Mamnuucidda in Dakhli Dawladeed Lagu Shubo ama Lagu Hayo Koonto Bangi ee aan ahayn Khasnadda Mideysan (TSA). Golaha Wasiirradu Wuxuu Meelmariyay Qaraarka Qodobadiisu Hoos Ku Qoran Yihiin:

Qodobka 1-aad Joojinta in Dakhli Dawladeed Lagu Shubo ama Lagu maareeyo Koonto Bangi oo aan ahayn Khasnada Mideysan (TSA)

1. Sida ku cad Qodobka 2(1)(r) iyo Qodobka 4-aad ee Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud, 2019, dhammaan dakhliga Dawladda Federaalka Soomaaliya waa in lagu shubaa, laguna maamulaa Khasnadda Mideysan oo keliya (TSA).
2. Si waafaqsan Qodobka 4(2) iyo Qodobka 42(4), waxaa mamnuuc ah in dakhliga Dawladda lagu qabto ama lagu hayo koonto bangi oo aan ahayn Khasnada Mideysan (TSA).
3. Si waafaqsan Qodobka 4(3) ee Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud, 2019, dakhliga Dawladda Federaalka waxa ku jira dhammaan lacagaha ay qabtaan hay'adaha Dawladda, iyo sidoo kale dhammaan lacagaha lagu soo ururiyo magaca hay'ad Dawladeed, ama midka Dawladda Federaalka Soomaaliya oo ay ka mid yihiin balse aan ku xaddidnayn dhammaan canshuuraha, khidmadaha iyo ganaaxyada kala duwan ee loo ururiyo si waafaqsan shuruucda iyo xeerarka kala duwan ee dhaqangalka ah.

Qodobka 2-aad Hay'adda Dawladda Mas'uulka uga ah Dakhli Ururinta

1. Sida ku cad Qodobka 8(2) ee Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud, 2019, Wasaaradda Maaliyadda ayaa ah hay'adda kaliya ee u xilsaaran ururinta, maareynta iyo la socodka dhammaan noocyada kala duwan ee dakhliga Dawladda Federaalka Soomaaliya.
2. Iyada oo aan waxba loo dhimayn doorkooda bixinta adeegyada Dawliga ah, dhammaan hay'adaha kale ee Dawladda, ha ahaadan rayid ama ciidan, waxaa ka mamnuuc ah, inay si iskood ah u ururiyan ama u maareeyaan dakhliga Dawladda, oo ay ka mid yihiin balse aan ku ekayn dhammaan canshuuraha, khidmadaha iyo ganaaxyada kala duwan.

Qodobka 3-aad Dejinta Tacriifadaha

1. Si waafaqsan Qodobka 6(b) iyo Qodobka 108 ee Sharciga Maamulka Dakhliga, 2019, Wasiirka Maaliyadda oo kaliya ayaa awood loo siiyay dejinta iyo wax-ka-bedelka dhammaan tacriifadaha saldhiga u ah noocyada kala duwan ee dakhliga Dawladda oo ay ka mid yihiin balse aan ku ekayn tacriifadaha dhammaan canshuuraha, khidmadaha iyo ganaaxyada kala duwan.

2. Iyada oo aan waxba loo dhimayn doorkooda dhaqan-gelinta iyo fududaynta bixinta noocyada kala duwan ee dakhliga Dowladda, dhammaan hay'adaha kale ee Dawladda, ha ahaadan rayid ama ciidan, waxaa ka mamnuuc ah dejinta iyo wax-ka-bedelka dhammaan tacriifadaha saldhiga u ah noocyada kala duwan ee dakhliga Dawladda oo ay ka mid yihiin balse aan ku ekayn tacriifadaha dhammaan canshuuraha, khidmadaha iyo ganaaxyada kala duwan.

3. Iyadoo u-hoggaansamaysa Qodobka 6(b) iyo Qodobka 108 ee Sharciga Maamulka Dakhliga, 2019, Wasaaradda Maaliyaddu waa in ay sahan dhamaystiran ku samayso dhammaan tacriifadaha hadda jira ee la xiriira ilaha kala duwan ee dakhliga Dowladda Federaalka Soomaaliya, si loo hubiyo in dhammaan tacriifadahaas, oo ay ku jiraan kuwa canshuuraha, khidmadaha, iyo ganaaxyada, ay la socon kara xaaladaha dhaqaale ee Dalka.

Qodobka 4-aad Dib-u-eegista Heshiisyada iyo Qandaraayadda aan waafaqsanyn Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud, 2019 iyo Sharciga Iibka ee Qaranka 2016

1. Si loo hubiyo u hogaansanaanta qodobbada sharciga islamarkasna looga hortago khataraha maaliyadeed ee ka dhalan kara, waa in dhammaan heshiisyada saamaynta maaliyadeed leh ee dhaqangalka ah ee sharciga baalmarsan la waafajiyaa Sharciga Iibka ee Qaranka, 2016, iyo Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud, 2019.

2. Dhammaan heshiisyada caalamiga ah ee saamaynta maaliyadeed leh ee Dawladda Federaalka Soomaaliya kula jirto shirkadaha shisheeye waa in dib u eegis lagu sameeyo lana waafajiyoo sharciga marka wakhtigoodu dhammaado kahor inta aan la cusboonaysiin.

3. Wasaaradda Maaliyadda waxaa la farayaa in ay hortabin siiso si joogta ahna u bixiso kharashaadka ka dhasha heshiisyada Dawladdu kula jirto shirkadaha gaarka loo leeyahay si looga fogaado ganaaxyada sharci ee ka imaan kara.

4. Qararkan waxaa lagu baabi'iyay dhammaan heshiisyada hoos ku xusan:

(b) Heshiiska lagu fuliyo adeegyada la socodka koonteenarada ee electrooniga ah (electronic container tracking) oo ay horay loo galay.

(t) Heshiiska lagu fuliyo adeega dhaqista koonteenarada (container cleaning services) oo horay loo galay.

(j) Heshiiska fayadhawrka ee Dowladda Hoose.

Qodobka 5-aad: Qodobo Qubane ah

1. Iskaanka lagu hubiyo badeecadaha kasoo dega Dekadda Muqdisho waa in la dhimo qiimaha adeegga konton boqolkiiba (50%) iyadoo khidmadda kasoo xaroota lagu qabanayo Khasnadda Midaysan.
2. Ganacsatada Soomaaliyeed ee badeecaddaha kala soo daga furdooyinka Soomaaliya waxaa la farayaa inay shahaadada caddaynta tayada baddecadda ay kala yimaadan shirkadda Veritas ee Dawladda Soomaaliya ugu xilsaaran hubinta tayada badeecadaha.
3. Waxaa la joojiyay lacagaha howl fududeynta ah ee aan sharciga ku saleysneyn ee ganacsatada looga qaado Dekedda iyo Garoonka Diyaaradaha.
4. Dhammaan mas'uuliyiinta iyo howl-wadeenada Shirkadda Alport Mogadishu, kuwa Furdada, Ciidanka Ilaalada Canshuuraha iyo hay'addaha kale ee amniga ma samayn karaan xannibaad ama daahis ay ka dhalan karto kharash ku siyaada badeecadda Dekadda.
5. Xukuumadda Federaalka Soomaaliya waa inay dejisaa qorshe lagu fududeynayo adeegayada laga bixiyo Dekedda Muqdishu.
6. Dhammaan shirkadaha dillaalayda furdooyinka iyo wakiiladda maraakibta (customs brokers & shipping lines) waxaa ka mamnuuc ah inay ku dallacaan ganacsatada lacagaha fududeynta ah oo lagu bixiyay si sharci daro ah.
7. Waxaa la joojiyay lacagaha laga qaado gaadiidka xammuulka ah ee ka baxa baraha koontaroolada ah ee magaalada Muqdisho sida Afgooye iyo Balcad.
8. Waxaa la yareeyay khidmadda Kaarka Ogolaanshaha Gelista Dekadda (Port Access Permit), waxaana laga dhigay \$40 doolar oo kaliya, iyadoo meesha laga saaray qaadista lacag dhan \$110 doolar.
9. Waxaa meesha lag saaray kharash kasta oo ku bixi jiray howlaha loogu yeeray Kontaynar-jabinta. Cid kasta oo ku lug yeelata qaadista khidmadaan la mamnuucay waxaa laga qaadi doonaa tallaabooyin sharciga waafaqsan.

10. Wasaaradda Ganacsiga waxaa la farayaa in ay u kuurgalid iyo wadatashiyo ka soo samayso cabashooyinka iyo khilaafaadka u dhexeeya ganacsatada, isla markaana soo jeedin ay keento Golaha Wasiirrada.

11. Waxaa la farayaa Wasaaradda Gaadiidka iyo duulista hawada inay keento qorshe lagu xallinayo cabashooyinka ka jira gaadiidka xamuulka ka qaada Dekedda Muqdisho, isla markaana soo jeedin ay keento Golaha Wasiirrada.

Council of Ministers Issues Resolution on Taxes and Government Revenue

Mogadishu, Wednesday, 21 August 2024 – The Council of Ministers of the Federal Government of Somalia, meeting under the chairmanship of the Prime Minister, H.E. Hamza Abdi Barre, adopted an important resolution concerning the prohibition of depositing or holding government revenue in bank accounts other than the Treasury Single Account (TSA).

Article 1 Prohibition on Depositing or Managing Government Revenue in Accounts Other than the Treasury Single Account (TSA)

1. Pursuant to Article 2(1)(r) and Article 4 of the *Public Financial Management Act, 2019*, all revenue of the Federal Government of Somalia shall be deposited into and managed exclusively through the Treasury Single Account (TSA).
2. In accordance with Article 4(2) and Article 42(4) of the Public Financial Management Act, it is prohibited to receive, hold, or manage government revenue in any bank account other than the Treasury Single Account (TSA).
3. Under Article 4(3) of the Public Financial Management Act, 2019, government revenue includes all funds collected by government institutions, as well as all monies collected on behalf of any government agency or on behalf of the Federal Government of Somalia, including but not limited to all taxes, fees, charges, and fines collected pursuant to applicable laws and regulations.

Article 2 Government Institution Responsible for Revenue Collection

1. Pursuant to Article 8(2) of the Public Financial Management Act, 2019, the Ministry of Finance is the sole authority responsible for the collection, management, and monitoring of all categories of revenue belonging to the Federal Government of Somalia.
2. Without prejudice to their role in providing public services, all other government institutions, whether civilian or military, are prohibited from independently collecting or managing government revenue, including but not limited to taxes, fees, charges, and fines.

Article 3 Establishment of Tariffs

1. In accordance with Article 6(b) and Article 108 of the *Revenue Administration Act, 2019*, only the Minister of Finance is authorized to establish and amend tariff schedules forming the basis of government revenue, including but not limited to taxes, fees, charges, and fines.
2. Without prejudice to their role in implementing and facilitating revenue collection, all other government institutions, whether civilian or military, are prohibited from establishing or amending tariff schedules relating to government revenue, including taxes, fees, charges, and fines.
3. Consistent with Article 6(b) and Article 108 of the Revenue Administration Act, 2019, the Ministry of Finance shall undertake a comprehensive review of all existing tariffs associated with the various revenue sources of the Federal Government of Somalia to ensure that such tariffs, including taxes, fees, and fines, remain appropriate to the country's economic conditions.

Article 4 Review of Agreements and Contracts Inconsistent with the Public Financial Management Act, 2019 and the National Procurement Act, 2016

1. To ensure compliance with the law and to prevent financial risks, all existing agreements with financial implications that are inconsistent with the law shall be brought into conformity with the National Procurement Act, 2016 and the Public Financial Management Act, 2019.
2. All international agreements with financial implications concluded between the Federal Government of Somalia and foreign companies shall be reviewed and aligned with the law upon expiration and prior to renewal.
3. The Ministry of Finance is directed to prioritize and regularly settle financial obligations arising from agreements between the Government and private companies in order to avoid legal penalties.
4. This resolution abolishes the following agreements:

(b) The previously concluded agreement relating to the provision of **Electronic Container Tracking Services (ECTS/ECTN)**.

(t) The previously concluded agreement relating to **Container Cleaning Services**.

(j) The municipal sanitation services agreement.

Article 5 Miscellaneous Provisions

1. The fee for scanning goods unloaded at Mogadishu Port shall be reduced by fifty percent (50%), and all resulting revenue shall be deposited into the Treasury Single Account.
2. Somali traders importing goods through Somali ports are required to obtain product quality certification from **Bureau Veritas**, the company designated by the Government of Somalia to verify product quality.
3. All facilitation fees imposed on traders at the port and airport that lack a legal basis are hereby abolished.
4. Officials and employees of Alport Mogadishu, customs authorities, tax protection forces, and other security agencies shall not engage in actions causing delays or restrictions that result in additional costs to goods at the port.
5. The Federal Government of Somalia shall develop a plan to improve and simplify services provided at Mogadishu Port.
6. Customs brokers and shipping line agents are prohibited from charging traders facilitation payments that have been obtained unlawfully.
7. Charges imposed on cargo trucks passing through checkpoints in Mogadishu, including those on the Afgooye and Balcad routes, are abolished.
8. The fee for the Port Access Permit Card is reduced to **USD 40**, replacing the previous charge of **USD 110**.
9. All charges associated with so-called "container breaking" operations are abolished. Any person involved in collecting such prohibited fees shall be subject to legal action.
10. The Ministry of Commerce is directed to investigate complaints and disputes involving traders and submit recommendations to the Council of Ministers.
11. The Ministry of Transport and Civil Aviation is directed to develop a plan addressing complaints relating to cargo transportation from Mogadishu Port and submit recommendations to the Council of Ministers.